

SOMALI CANADIAN
ASSOCIATION
OF WATERLOO REGION

TAAGEERADA
Bulshada



SCAWR 2023
War-bixinta Saameynta

JADWALKA MACLUUMAADKA

ARARTA/AMA HOR-UDHACA AGAASIMAH A FULINTA	— Bogga - 04	AYADOO LOO MARAYO INDHADA/ARAGTIDA SHAQAALAH SCAWR	— Bogga - 12
XIGASHADA BULSHADA SCAWR	— Bogga - 06	ARAGTIDA SCAWR EE DADKA AY SHAQO WADAAGTA YIHIIN	— Bogga - 18
GUULAHAA LA TAABAN KARO 2023	— Bogga - 08	ARAGTIDA HOYOYINKA SOOMAALIDA: BARNAAMJKA WAX AKHRISKA	— Bogga - 22
HORUDHAC	— Bogga - 10	ARAGTIDA DHALLINYERADA KA QEYBGASHA SCAWR	— Bogga - 26



ANNAGU MA AANAN AWODI LAHEYIN IN AAN SAMEYNO WAXA AAN SAMEYNEYNO ADINKA LA,AANTIIN.

Waxaan si qoto Dheer mahad ugu heyntaa maalgeliyayaasha badan ee taageerey shaqada muhiimka ah ay SCAWR bulshada u heysa. Taageeradiina waxaanu ku dhiseynaa bulsho xoogan oo mideysan Taasoo qof weliba si loo siman yahay u heli karo adeegyada bulshada dhexdeeda ah.



LYLE S. HALLMAN
FOUNDATION



TAAGEERADA BULSHADA



Aragtida

Marka laga hadlayo SCAWR,
aragtidayadu waa in aan kobcineyno bulsho
Soomaaliyeed oo midaysan oo barwaqaqo
ku leh Gobolka Waterloo.



Howlgalka

Hadafkayagu waa inaan dhiirigelino oo aan
xoojino bulshadeena iyada oo loo
marayo ka-qaybgal firfircoon,
ka-qaybgal macno leh, iyo u-doodid iskaashi
la leh ururrada guud.



SCAWR 2023
War-bixinta Saameynta

ARARTA/AMA HOR-UDHACA AGAASIMAHA FULINTA

Anigoo ah Agaasimaha Fulinta ee Cusub ee Ururka Somali Canadian association of Waterloo Region (SCAWR) oo waxaan aad ugu faraxsanahay inaan wadaagno warbixintenna saameynta leh iyo dhaxal-galka ururka Somali Canadian Association ee Gobolka Waterloo. Sharaf bey ii tahay in aan qeyb ka ahaado socdaalka ururka cajibka ah, waday howlgal si loo dhiirigeliyo loona awoodsiyo bulshadeena iyada oo loo marayo ka qaybqaadasho firfircoor, hawl micno leh, iyo iskaashi u doodid lala yeesho ururada guud. waxaana naga go'an in aanu wax ka barano hogaamiyeyaa sheena waayeelka ah ee caqliga leh ee dhidibada u dhigey waxa SCAWR maanta tahay. Waxaan sii wadi doonaa in aan dhisno quwadooda iyo in aan sawir ka qaadano xigmadooda si aan rigo weyn ugu riyoono mustaqbalka. Hawl iyo dadaal baa la geliyey si riyadaan looga dhigo mid rumowda horey iyo haatanba waxaana naga go'an wadiiqo mideysan oo horey loogu socdo.

SCAWR waxay sii waday inay isbeddesho sanadihii 30-kii sano ee ugu dam-beeyay waxayna u adeegeen isbedelka bulshada. Iyadoo la marayo tobannan sano oo waayo-aragnimo ah oo ku saabsan bulshada, waxaan awoodnay inaanu bixino iyo inaan abuurno adeegyo ka jawaab-celinaya baahiyaha Bulshada. Dabeecadeena aasaasiga ah oo leh xubinnimo ballaaran, iskaashiigena ururada ee kala duwan, khibradeena muhiimka ah ee ururinta bulshada, iyo diiradda aan saarnay awoodsiinta bulsho ee aanu u leenahay ayaa nagu dhiirrigelisay inaan ka fikirno oo aan kaga jawaabno cod midaysan. SCAWR waxay dhistay buundo si wax looga qabto baahiyaha bulshada iyada oo la

joogteynayo iskaashi xoogan oo ay la leeyihii hay'ado kala duwan sida Adeegga Booliska Gobolka Waterloo, United for Literacy, WRDSB, Camino oo ah Magaalada Kitchener, Adeegyada Qoyska Samp; Carruurta, Project Read, TLG iyo ururro kale oo badan oo bulshada ah.

Sanadkaan wax aan hagney nidaamyo adag oo aynu la shaqeyneyno bulshada kallana shaqeyneyno xallal ku qotoma awooda bulshada, diiradana lasaarey guryo la awoodi karo dadna ku fillan, la kordhiyeyna baahida caafimaaka mas-kaxda iyo keli ahaanshaha, qiiimaha nololeed ee sii kordhaya, sidoo kale sinnaan la'aanta midab takoorka, bulshadda, iyo kala sooc laamaha nidaamka. Waxa aan baranay in aanan dhibaatooyinka bulshada ku xallin karin maskax shaqsiyadeed balse loo marayo hab-dhismeed wadajir ah oo lagu dhiso kalsooni guud ahaan nidaamyada, iyo in la helo habab lagu dhiso bulshada oo wadajir ah.


Warbixintan Saameynta ah waxay u dabaaldegeysaa waxqabadkeenna, taariikhdeena, dhaxalka SCAWR, waxayna muujineysaa shaqada saameynta leh ee hadda ka socota Ururka Soomaali Canadian Association ee Gobolka Waterloo. Waxaanu ku faaneynaa in aan soo gudbino guul cajib ah; annaga oo adeegsanayna iskaashi aan la leenahay Gobolka Waterloo, 30 qoys oo Soomaali ah ayaa laga taageerey barnaamijka la magac baxay Dhisida Mustaqbal Fiican ee barnaamijka kaabaha kirada, yareynta culeyska dhaqaale iyo taageeridda helitaanka qoysaskaas si ay u helaan deegaan ku filan.



SCAWR 2023 War-bixinta Saameynta

Dhammaanteen waxaan gaarnay ilaa iyo hadda waa natijada ka go'anaanta shaqaalaheena iyo dadaalka ay u qabaan daryeelka macmiilka, dareenka mu-tadawiciinta, taageerada deeqsinimada leh ee maalgaliyeysaasheena, ka qayb qaadashada iyo ku luglahaanshaha bulshada aan u adeegno, iyo diyaarinta saaxiibadeena si aan u qabano shaqada adag oo ay la garab taagan yihiin SCAWR ee bulshada. Annagu ma aanu qaban karin shaqadan ADINKA la'aantiin! Mahadsanadiin! Waad ku mahadsan tiiuin inaad nala wada socotaan safarkan - tani waa uun bilowgii – waxaana rajeyneynaa dhammaan wixii aan midnimada ku gaari doonno.

Mahadnaqid
Faduma Musse
Agaasimaha Fulinta ee SCAWR



Faduma



**Annagu ma aanu qaban karin shaqadan
ADINKA la'aantiin! Mahadsanadiin!**

**Waad ku mahadsan tiiuin inaad nala
wada socotaan safarkan - tani waa
uun bilowgii – waxaana rajeyneynaa
dhammaan wixii aan midnimada
ku gaari doonno.**

**MUUQAALKA WARBIX-
INEEDKA SAAMEYNTA**



DAAWO
HALKAN!

Caqabadaha ay wajahaan xubnaha bulshada & guud
ahaan sida AY SCAWR wax uga qabato arrintan

44

Waantu ka faa, ideysaney dhamaan barnaamijya-da gaar ahaan barnaamijka shaqada guri. Waxaan awoodaa in caruurteyda si bilaash ah wax iigu bartaan. Waxey halkaan yimaadaan labbo jeer asbuucii; waxey la kulmaan dadkooda ayagoo isla markaasha wax baranaya.
~ Feynus

44

Waxaan u baahan nahay bulsho si aan isugu imaan ama kullano. Qof kasta wuxuu u baahan yahay bulsho. Ma ahaan kartid bulsho la, aan.
- Hanan Roble

Waa dariiq wanaagsan in ay Soomaalida diirada saaraan sidii uu midba midka kale ugu xirnaan lahaa. Midba kan kale wuu fahmaa maxaa yeeley waxaan wada wadaagnaa diin iyo dhaqan, sidaa darteed waxaa inoo fiican in aan isku xirnaano.
- Hanan



Dareen lahaanshiyadeed ee bulshada dhexdeeda ah.

44

dhabitil waan ku littaa xisaabta. Hadaba Daryl, ninka dadka ka caawiya barnaamijka shaqada guri, ayaa xaqiliqdil i caawinaya, waxaa kaloo jira banyaal badan oo sidliisa oo kale ah kuwaasoo sidoo kale liga caawiya xisaabta.
- Hanan Roble

Waan ka faa, ideystey barnaamijkaan gaar ahaan kan akhriska, waxaan awoodey in aan horumariyo buundooyinkeyga sidoo kale la bulshadeeyo gayaankeyga
- Ahlaam

77

Barnaamijka shaqada guri wuxuu iga caowiyeg in aan horumariyo buundooyinkey in badan.
- Amira

Waxey u maleynayaa in ay muhilim tahay in si weyn looga mid ahaado maxaa yeeley barnaamijyo badan oo lamid ah ma heysano. Hadaba si qeyb wax looga noqdo/ waa in la heystaa bulsho halkaasoy dadka taageero tsugu lmaan karaan, ama hadli wax loo baahdo. Had iyo jeeraale waa muhilim in la heysto bulsho.
- Ahlaam

77

Waxaan qeyb ka ahay barnaamijka shaqada guri iyo kubada kolleyga ee gabdhaha taasoo laqabto sabtlyada. Waxaa is leeyahay in aan wax badan ka bartey SCAWR sameysteyna asxaab badan inta mudadaan lagu guda jirey.
- Ashwaaq

“

Xaqiqliidii waan jeclahay dareenka bulshada aan heysano, sidoo kale waxaan dhabtil arkey buuwdinta lagu xalnayo baahiyaha guryaha ee xubnaha bulshada, iyo in aan qeyb ka noqono unur kaaso taageera awoodna siliya bulshada.

- Ayan

Dhamaan wajibaadyada aan halkaan ka qabano si qalbi ah baan ugu raaxeystaa... shaqooyinka kalla duwan oo ay Soomaali Community qabanayaan waa kuwo aan la cabiri Karin.

- Jamac

“

Waxa aan aadka ugu jeclahaya ee la shaqeynta SCAWR ayaa waxey tahay in aan arko xubnaha bulshada, ama qof kasta oo baahiyoo qabo, oo hadana baahiyahooda la xallyey, iyo in lasliyo taageerada ay u baahan yihiln.

- Abdirazak




“

Waxa aan ugu jeclahay ka mid ahaanshaheyga SCAWR ayaa waxey tahay in aan awood siilo bulshada Soomaaliyeed taasoo aan anigu ka soo jeedo. Aad baan ugu farxsanahay in aan arko xogaanka iyo qaab-dhismeedka iyo in uu ururka korayo uuna horumarayo. Waan ku faraxsanahay in aan arko dhamaan dhallinyerada iyo caruurta kuwaasoo xaatan ka qeybgalaya barnaamijyada si ay u noqdaan hogaamiyayaasha cusub iyo mustaqbalka beri ee SCAWR.


- Faduma Muse

Koritaanka shaqsi ahaaneed/qiimaha shaqo (wadashaqeeqayaasha iyo shaqaalaha SCAWR)




ADEEGYADA TOOSKA AH EE LA BIXIYEY

63%	ADEEGYADA SOCDAALKA	4%	WAXBARASHADA
21%	GURYEINTA	4%	KUWO KALE
5%	SHAQAALEYSINTA	3%	GAAFIMAADKA




**BALLAMAHAA
ADEEGYADA
TOOSKA AH/
JINSI AHAAN**
NOVEMBER 2022 - 2023

FEMALE
MALE




**BALLAMAHAA
ADEEGYADA
TOOSKA AH/ JINSI AHAAN**
NOVEMBER 2022 - 2023

62% SHAQSI AHAAN
36% TALEEOFON
1% IIIMEYL



**WADIQOOGINKA
BALLAMAHAA
XIRIIRADA**
NOVEMBER 2022 - 2023

Waxaan baraney in dhibaatooyinka bulshada
aan lagu xalin Karin si shaqsi ahaaneed balse
lagu xalin karo si wadar ah taasoo aaminaad
ka dhex dhiseyso guud ahaan nidaamka,
iyo in la helo wadiqooyin bulshada si wada
jir ah loo xaliyo.



**BALLAMAHAA
ADEEGYADA
TOOSKA AH/ JINSI AHAAN**
NOVEMBER 2022 - 2023



2023

Guulaha la taaban karo

300

shaqsiyood ayaa la siiyey
adeeg toos ah lagan
siiyey xafiiska

30

qoys oo Soomaali ah
ayaa laga taageeray
banaamijka Dhisada
Mustaqbal Filican

Adeegyada tooska
ah ayaa lasii yey

1,042+

kuwa imada ballan la,
aan iyo ballan ayna
caawiyeen shaqaalaha

Xagaagan waxa aan awoodney in aan taageerno shaqaaleysiin
mid gudaha ah iyo mid dibada ah

25 dhallanyero oo Soomaali ah

In kabadan

30 qoys ayaa laga

taageerey barnaamijka akhriska ayadoo loo marayo

In kabadan

**80 dhallinyero iyo caruur ah baa
ka qeybqaadatey marnaamijka
isboortiska kuwasoo da,
doodu u dhexeyso:**



In kabadan

55 ardey ayaa laga

taageerey barnaamijka shaqo guri ayadooy nagu wehliyaa
Camino iyo United for Literacy inta da,dooda u dhexeyso 8-18 sanno.



KUBADA KOLEYGA GABDHADA DA,

DOODU TAHAY 8 - 18;

30 AYAA KA SOO QEYBGALLEY



KUBADA KOLLEYGA WIILASHA DA,

DOODU TAHAY 16 IYO KA WEYN;

20 AYAA KASOO QEYBGASHEY



KUBADA CAGTA WIILASHA DA,

DOODU TAHAY 8 - 20;

30 AYAA KASOO QEYBGASHEY

HORUDHAC

Dalka Canada, tirada dadka soomalida ee Canada waxay isku sharfayaan taarikh hodan ku ah degitaan, oo ay ku qotonto jiilal badan oo soo galooti ah dhamaan mawjadaha kala duwan ee muhaajiriin ah. Waqtigan xaadirkha ah waxaa jira qiyaastii 38,000 oo Soomaali jiilka koowaad ah, 27,000 oo qof ahna jiilka labaada iyo 600 oo qof oo jiilka sedexaad ah oo dhammaan asal ahaan kasoo jeeda Soomaali. Jaaliyadda Soomaaliyeed ee kusoo kordhaysa gobolka Waterloo oo tiradoodu ay tahay qiyaasta 1,795 qof, waa dad kala duwan, adkeysanaya oo ku kordhaya inkastoo ay taariikh ahaan la dhaceen caqabado dhowr ah oo si qotodheer u saameeyay noloshooda maalinlaha ah iyo is dhengalka bulshada guud.

Caqabadaha afka ee xubnaha bulshada qaarkood waxay abuuraan caqabado ku aaddan helitaanka macluumaadka iyo adeegyada muhiimka ah, sida kuwa diiradda lagu saarayo taageerada socdaalka iyo shaqo-abuurka. Intaas waxaa sii dheer, la qabsiga dhaqan cusub iyadoo lala kulmo takoorka ama taageero la'aanta dhaqan ahaaneed ee xasaasiga u ah in ay caqabad weyn ku tahay maritaanka khayraadka iyo nidaamyada, in badan oo ka mid ah bulshadu waxay waayeen wacyigelin guud oo ku saabsan xuquuqdooda, dhaqaala-ha iyo adeegyada ay xaq u leeyihiin, waxayna inta badan is arkaan inay raadsadaan dareen ay ku sax yihiin gudaha iyo dibadda bulshadooda afaafka iyo dhaqanada kalla duwan leh.

Ayadoo la tixgelinayo waayo-aragnimadooda ay soo mareen 73 dhalinyaro ah

oo ku sugaran gobolka Waterloo kuwaas oo siiyey SCAWR jawaab-celintooda ku aaddan indha indheeyta dhallinyarada Madowga ee muslimka ah, kuwaas oo ay badankood yihii Soomaali, waxaa jira dhowr isbeddello walaac ah. Qayb aad u muhiim ah - 32 boqolkii - ka mid ah dadka soo jawaabay waxay muujiyeen in caafimaadkooda maskaxdu uusan ahayn mid wanaagsan ama aad u fiican, iyadoo 13% ay si gaar ah u xuseen caafimaadka dhimirka oo liita. Intaas waxaa sii dheer, 43 boqolkii waxay dareemeen in aysan si raaxo leh ugala hadli karin caafimaadka maskaxda ama dhibaatooyinkooda shahsiga ah waalidkood ama kuwa ay jecelyihiin

Sidoo kale, waxbarashada iyo nabadjelyada, ayaa la xusay caqabado. Boqolkii 40 waxay soo sheegeen in ay wajahayaan faandaruno la xiriira jinsi-yadooda ama diintooda marka ay joogaan goobaha shaqada, iyo boqolkii oo ku habboon si joogto ah kuma riyaaqin ka qayb galika fasalada. In lamid ah boqolkii inta hore ayaa waxaa ay qeexeen in uu danbiyada ku badanayo bulshadooda dhexdeed si aan loo meel deyin ayeyna u saameysey dhaliyara madowga ee muslimiinta ah.

Walaaca ku aadan mustaqbalka, taasoo isugu jirta hiigsiga mustaqbal shaqo iyo mid iskuulba, miisaanku aad buu oga badnaa 70 boqolkii dadka soo jawaabey, muujinaya dareen culus oo hubaal la,aan ah. Intaa waxaa dheer, 19 boqolkii waxey tilmaameen in aysan jirin helitaan joogto ah ee taageerida waxbarashada qoysaska iyo 22 boqolkii waxey ka dhawaajiyeen in aysan xi-



SCAWR 2023 War-bixinta Saameynta

riir wanaagsan la yeelaan macalimiinta. Qodobbadaan xogtu waxay hoosta ka xariiqayaan caqabadaha kala duwan ee ay la kulmaan dhalinyarada Soomaaliyeed ee ku sugaran gobolka Waterloo. Ka turjumaya caqabadaha caafimaadka maskaxda ka jira, kaalmada qoyska, waxbarashada, takoorida, ay la jaan qaadayaan hiigsigooda mustaqbal.

Tan iyo markii la aas aasey SCAWR waxey door muhiim ah ka cayaartey buundada isku xirta xubnaha bulshada iyo bulshada Canada. Ayadoo sidoo kale u ololeynaya kaalintooda sinaanta iyo awood siinta. SCAWR waxey bixisaa adeegyo la xiriira dhaqanada iyo luuqadaha xasaasiga ah, barnamijyo iyo gudbin tiro badan oo shaqsiyaad Soomaaliyeed ah oo raadinaya caawimaad iyo in lagu xiro bulshadooda ee Gobolka Waterloo.

In la taageero dadaalada SCAWR eek u aadan fahamka wanaagsan ee bulshada Soomaaliyeed iyo maqaamkooda, waxey u baahan tahay khibrada, labbo lataliye ayaa la shaqaaleysiyyey si ay u horseedaan xogta diirada lagu saarayo xog aruurinta xubnaha bulshada Soomadiyeed sida shaqaalaha SCAWR, dumarka iyo hooyoojinka Soomaaliyeed, ciyaalka iyo dhallinerada. Qiyaas ahaan 58 oo xubnaha bulshada ah ayaa ka qeybqaatey wada-hadal kooxeedyada. Jawaab-celintooda oo ay weheliso xogta kale ee kormeerka barnamijyada, waxey SCAWR u ogolaaneysaa inay ka fikirto una ololeyso sidii ay u heli lahaacyeen bulsho Soomaaliyeed oo awood badan ku leh Gobolka Waterloo.



AYADOO LOO MARAYO INDHAHA/ARAGTIGA SHAQAALAH SCAWR

Nidaamka adeega ee ka jira Gobolka Waterloo wuxuu inta badan ku dhacaa si gaabis ah marka la doonayo in laga jawaabo baahiyaha iyo daruufaha xubnaha bulshada. Tani waxay si gaar ah uga run tahay xubnaha bulshada la haybsoco, kuwa cusub iyo kuwa ugu horrayn ka hadla afkooda hooyo. Saamaynta guud ee caqabadaan ayaa horseeday in qaar ka mid ah xubnaha bulshada ay ka fikiraan inay ka baxaan gobolka Waterloo, iyo mararka qaar, Canada.

Tusaale ahaan xaaladaha degaanku waa arrin muhiim u ah dad badan oo deggan Gobolka Waterloo. Tan ugu horeyn waxaa Kalifa mudada dheer ee lasugayo guryaha bulshada, taasoo kordhisey culeys dhaqaale iyo dareen rajo la, aan ah kuna ah dadka deegaanka. Dhanka kale bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda, Dhanka kale, bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda, wacyigelin

la'aanta ku aaddan xuquuqda sharciga iyo ilaalintu waxay gacan ka geysatay dhibaatooyin ka dhan ah deganaanshaha iyo ka saarista oo ay xuseen xubnaha ka tirsan ururka SCAWR inay yihiin kuwo sii kordhaya

Intaa waxaa dheer, bushada waxey wajahaysaa caqabado dhanka bulsho iyo mid qaab dhismeed ahaaneed, takoor ka dhex jira goobaha waxbarashada, iyadoo ay si naxdin leh u kordheen ardeyda soo sheegeysa takoor iyo islaam naceeb. Iskuulada waxaa soo if baxaya dembiyada la xiriira naceybka iyo maagida ayadoo tiro ka mid ah waalidiinta ay ka walaacsan yihiin natijjada kisaska la keeney.

26%

boqalkiba dhalinyerada madowga ee musliminta ah ee jawaabta bixiyey waxey sheegeen in ay la kulmeen caqabado xayraado la xirira in ay helkaan fursado shaq taasoo sabab u tahay takoorka ku wajahan dinta ay kasoo jeedaan ama is waafajin la, aanta ka dhaxeyso dlintooda iyo goobta shaqada

40%

boqalkiba dhalinyerada madowga ee musliminta ah ee jawaabta bixiyey waxey sheegeen in ay goobaha shaqada kula kulmaan fikir khaldan oo huwan ah iyo eex

46%

boqalkiba dhalinyerada madowga ah ee musliminta ee jawaabta bixiyey waxey dareemayaa in heerarka dembiyada ee bulshadooda si aan loo meel deyin saameyn ugu leeyihin dhalinyerada madowga ee musliminta ah

Xubnaha bulshada Soomaaliyeed ma haystaan si siman oo ay u helaan adeegyada dawladda. Tusaale ahaan qofka madawga ah ee dalka ku cusub ma awoodo inuu helo adeegyo sida ay ugu fuduhay dadka halkaan kasoo jeeda waxaa intaa dheer, adeegyadu waa gabaabsi sababtoo ah waxey ku saleysan yihiin nolol qiiimo jaban, taasina waxey caqabado joogto ah u abuureysaa bulshada taasoo sii xumeyneysa helitaanka gaabiskaan.

Caqabadaha kale ee jira waxaa ka mid ah farajiga ka jira xirfadaha iyo waxbarashada oo hor istaagaya isdhhexgalka suuqa shaqada, takoorka shaqada ee ku saleysan dhaqanka ama diiniga ah ee loo hayo dumarka Soomaaliyeed iyo in aysan heysan daryeelka caruurta oo ay awoodi karaan taasoo hor istaageysa ka qeybgalkooda ku aadan xoogsiga shaqada, lana sii xariirta caqabadaha caafimaadka maskaxda keenteyna keli ahaanshaha iyo awooda xadiid ee lagu dhix daro xubnaha bulshada dhexdeeda.

Qaabka istiraajiyada mudnaansiinta SCAWR ee kor u qaadista taageerada waxyaabaha xasaasiga ku ah dhaqanka, ayadoo laga dalbanayo xafiiskoo ku yeel gudaha magaalada iyo barnaamijiyada aagagga ay degan yihiin bulshada Soomaaliyeed, ayaa dad badan u caddeeyay inay qalab u yihiin.

Aas aasida goob dhexe, kana hawlalaan gaadiidka dadweynaha daboolana Cambridge, Kitchener iyo Waterloo ayaa bulsho weynta soomaaliyeed siiyey suurta galnimo cusub, taageerada tooska ah ay bixiyaan shaqaalaha kuwaasoo fahmey caqabadahooda, awoodooda, iyo baahidooda dhaqan ayaa loo tixgeliyey si qiiimo leh. Marin-galkan oo sare loo qaaday, oo ay weheliso adeegyadda afka Soomaaliga, ayaa kordhisay dareen rajo iyo raaxo ka dhalata bulshada dhexdeeda, taasoo ku dhiirigelineysay inay si furan ula wadaagaan caqabadaha iyo baahihooda si kalsooni leh oo ay wax uga qaban karaan Shaqaalaha SCAWR.

Xubnaha shaqaalaha waxay si aad ah u dabagal ku sameeyaan shakhsiyadka ay taageerayaan, iyagoo bixinaya adeegyo toos ah iyo caawimaad ku aadan ku hagida hababka adaga sida hanaanka socdaalka ee deganaanshaha joogtada ah. Ujeedada ayaa ah in la caawiyo kuwo bulshada ka midka ah ee lagayaabo in uu dhaco maroor dilaac. In la arko saameynta togan ee dhiiri gelinta iyo niyad-wanaaga bulshada dhexdeeda ku yeelaneysa ayaa ah abaalmarinta gaarka ah ee shaqaalaha, bixinaya dareen wada-wadaag ee dhimistirka iyo mahadnaqa isugu jira.

waxaa caqabado iga soo mareen usoo socdaalideydi Canada markii aan sagaal jir ahaa. Waxeyna aheyd in aan caawiyo hooyadey si ay u hesho adeegyada. Mana aanan heysan hayad sida SCAWR ee na caawisa. Wuxaan sameyn jirey tur-jumis iyo in aan buuxiyo dukumintiyada socdaalka mana aanan fahmeyn. In aan caawiyo qoysas kallene waxey illa aheyd aduunyo kale

Shaqaalaha SCAWR waxey si weyn isha ugu hayaan yareynta shidda, walaaca, iyo diiqada dereen ee shaqsyaadka helaya adeegyada tooska ah. Samatabixinta ee wajida kalla duwan leh, ayaa had iyo jeer ka imaata kaalmo u muuqata mid yer. Tusaale ahaan, in laga caawiyo shaqsyaadka lasiiyey waraaqda ay guriga oga baxayaan, sida la xiriirsta masuuliyiinta gobolka ama xogwadaaga, ayaa si muuqata u yareysa shidada iyo hubanti la,aanta . shaqaalaha waxey maanta rumeysan yihi-in in ay shaqadooda leedahay micno buuxa maadaama ay jirto shaqaalaha adeega ku bixiya afsoomaaliga ee hayadaha kale ee ka hawlgalka Gobolka Waterloo.

Doorka hayadaha dhan olole ahaan ayaa xitaa sii kortey sannadadaan, taas oo calaamad u ah codka bulshada Soomaaliyeed oo ay ka muuqato caqabado dhismeed iyo nidaam ahaanba, xubanaha shaqaalaha ayaa raadinaya in ay fududeeyaan awoodiinta ku wajahan ololeeynta iyadoo bulshadu ay sii wadaan inay la tacaalaan eexasho iyo dhinacyo cad oo ku salaysan jinsiyadooda,xaalada socdaalka, xirfadaha luuqada iyo asalka diinta.

32%

boqolkiiba ee dhaliyarada madowga musliminta ah ee jawaabaha bixiyey ma aysan hoga busaaleyn in xaaloadooda caafimood ee dharka maskaxda ah uu wanaoqsan yahay ama uu heer sare yahay, ayadoo lalo qabo in 13 boqolkiiba ay xaaloadooda caafimood ee dharka maskaxda ah uu lito

43%


boqolkiiba ee dhalinyarada madowga musliminta ah ee jawaabaha bixiyey ma aysan ogalooin in si hufan ulla wadaagi karoan xaaloadooda caafimoodka maskaxda ama danuufaha shaqiyadeed waalidintooda ama dadka ay jecelyin

Sida laga soo xigtay shaqaalaha SCAWR, barnaamijyadooda iyo adeegyadooda waxay si weyn uga qayb qaataan kobcinta dareen ka mid ahaansha-ha ka-qaybgalayaasha. Ka shaqeynta safka hore iyo heerarka nidaamyada labadaba, SCAWR waxay si firfircoo u sameysaa iskaashi lala yeesho ururo badan, hay'adaha dawladda hoose, iyo shabakadaha qorshaynta. Waxaa xusid mudan, ka mid ahaanshahooda sida Children and Youth Planning Table of Waterloo Region (CYPT), in kabadan 60 hayadood oo maxali ah ayaa garabtaagan codka bulshada Soomaaliyeed ee go,aan gaarista iyo nidaamka dowlad deeganka. Iskaashiga hay'adaha kala duwan ee adeeg bixinta, SCAWR waxay buuxisaa farqiga maclumaadka, iyadoo xaqiijineysa in adeegyadu ay gaaraan dadka nugul ama la haybsocayo ee Soomaaliyeed



TAAGEERADA BULSHADA

Intaa waxaa dheer, dadaallada iskaashiga ee ururku la leeyahay saaxiibada iyo awooddooda ay u leeyihii inay si firfircoo uga qayb qaataan una dhageystaan baahiyaha bulshada ayaa dhaliyay natijjooyin lama filaan ah. Waxaa xusid mudan in SCAWR ay goob joog ka tahay bulsho aan Soomaali ahayn oo sii kordheysa, kuwaas oo taageero doon doonayay, sababo la xiriira taloo-eyin erey-bixin ah oo ka timid saaxiibadooda Soomaaliyeed. Tani waxey si hufan adeegyada ugu gudbineysaa bulshooyinka kasoo jeeda bariga Africa iyo kooxyo kalla duwan sida Siiryaanka, Naajjeeriyaanka, iyo kuwo kale, taasoo hogu tusaleyneysa ka go,naanshaha SCAWR ee furnaanta iyo awoodistaba leh. Mid ka mid ah shaqaalaha ayaa carabka ku adkeeyey:




Marka la eego dhinaca mustaqbalka, SCAWR waxey ku fikireysaa wajahaad mideysan oo kusii wajahan si mideysan, deegaan ahaan, gobol ahaan, heer federal ahaan iyo mid caalamba, taasoo u jeedadeedu tahay in fursado loo abuuro bulshada Soomaaliyeed in ay waxna iska bartaan ooyna is ku caawiyaan. Tani waxey billaabeyso qirida baahida loo qabo in laheloo xogta deegaanka ee bulshada Soomaaliyeed si loo qaabeeyo barnaamijada si wax tar lex.

Maadaama caafimaadka maskaxdu uu weli yahay walaac weyn bulshada dhexdeeda, SCAWR waxay doonaysaa inay u qoondeyso maalgelinta mustaqbalka si loogu qoondeeyo barnaamijada wax ka qabashada baahiyahaas. Waxaa intaa dheer in ay maal-gashi ku sameeyaan is-dhexgalka iyo ka-qaybgalka suuqa shaqada ee bulshada Soomaaliyeed iyada oo loo marayo waxbarashada



iyo kaalmada ka go,naanshaha. Tallaabooyinka mustaqbalka waxaa sidoo kale ka mid noqon kara in dib la isugu xiro bulshooyinka Soomaalida ah ee Gobolka Waterloo ku sugaran iyo qoysaskooda dibada ku sugaran ayadoo loo barayo dib u mideynta hababka kafaalashada.

Aas aasida Xarun dhexe ee bulsho ayna iska leeyihii bulshada Soomaaliyeed, lana mid ah kuwa kooxyaha dhaqan ee kale leeyihii sida kooxda Bortiqiska, ayaa ah hadafka dheer ee SCAWR ku fikireyso. Xaruntan oo lahelaa waxay sii xoojineysaa barnaamijada hada jira, in ay bixiso bar kulan bulshada ka qeybqadato laguna taageero, iyo in la sii xoojiyo wadajirka iyo midnimada bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda.



Heer shaqsi ahaaneed, xubnaha shaqaalaha ayaa la wadaagay in ay ku faraxsan yihin in ay ku lug leeyihiiin ururka SCWAR oo ay dareemayaan dareen xoo-gan oo ah in ay ku abtirsadaan ururka gudhiisa. Awooddoda ay ku arkaan isbeddello la taaban karo oo ku yimid nolosha dadka ay caawiyaan ayaa waxay kobcisay farxad iyo xiisado ay shaqadooda ku hayaan. Isla markaasna, dadaalka guud ee kooxda ee ku aaddan bulshada iyo habka wadajirka ah ee xalinta dhibaatada ayaa abuurtay jawi u sahla horumarinta xirfaddooda.

Dad badan oo ka mid ah shaqaalaha, in kaalmo toos ah la siiyo qoysaska ku jira adeegyada ka shaqeeya waxay keenaysaa dareen ah isu dhawaanshaha qoysaska oo si qoto dheer u macquulsan sababtoo ah waayo-aragnimadooda shakhsii ahaaneed ee wajahaya caqabadaha la xiriira socdaalka. Heshiiskan waxa dib loogu xoojinayaa iyada oo loo maraayo u doodista qoysaska la kulma caqabadaha la midka ah, khaas ahaan kuwa la xiriira is-gaadhsiintu ama adeegyadda sharciga iyo guryaha.

Markhaatifurka iyo qisooyinka saameynta leh ee ay shaqaalaha wadaagaan ayaa waxay muujiyeen farqiga baaxadda leh ee lagu sameeyay nolosha shakhsiyaadka iyada oo loo marayo faragalinta SCAWR. Tabaaburada meesha dadka cusubi ay la kulmaan caqabadaha bureaucratic-ka dib imaanshada Kanada ama shakhsiyaadka la kulma ka saarista aan sharciga ahayn waxay tusaale u noqonayaan doorka muhiimka ah ee ay ciyaartay SCAWR si loo xalliyio arrimaha adag. Iyada oo loo marayo u dooddida, xiriirk-dhisidda ee adeeg bixiyayaasha, iyo taageerada dadaalka leh, SCAWR waxay si wax ku ool ah wax uga qabataa caqabadaha afka, ceebeynta jinsiyadeed, iyo caqabadaha nidaamka, ugu dambeyntii awood u siinta shakhsiyaadka inay helaan adeegyada lagama maarmaanka ah, guriyeynta ammaan, iyo inay si guul leh u maraan hababka xafiisyada.



SCAWR 2023
War-bixinta Saameynta

in lala shaqeeyo shaqsiyaad-kan ka go, naanshaha leh keli ah iima ogolaanin in aan si wanaagsan wax ula qabto bulshada Soomaalida Canada balse waxey ii aheyd fursad weyn oo aan wax ku barto . aad baan ugu faraxsanahay hadafka ah in aan sii joogteeyo waxbara-shada iyo koritaanka, ayadoo lala qabo hamiga ah saameyn waarta kooxda iyo macaamii-sha loo adeego

ARAGTIDA SCAWR EE DADKA AY SHAQO WADAAGTA YIHIIN

Marka la fiiriyo dadka kala duwan ee ay howl-wadaagta yihiin SCAWR waxay ku dadaalaysaa inay dhisto nidaam ku dhisan gaaridda yool mid ah oo la isla og-yahay si loo yareeyo caqabadaha ku hor gudban Meesha la higsanayo, gaar ahaan qoysaska aan awoodin inay iska bixiyaan usguulada gaarka loo leeyahay ee ilmaha waxbarshadooda lagu soo dhiso, carruurta la nool waalidiinta Ingiriisiga ku baranaya guriga, shaqo gurigga carruurta loo soo diro (homework) ama kuwa ay ka go'an tahay dhamisystirka howlahaas. Helitaanka deegaan ammaan ah waxay taageeraysaa waxbarashada dhalinyarada sidoo kale abuurida barnaamijyada lagu caawinayo dhalinyarada waxay kor u qaadaysaa kalsoonida ardada dhexdooda iyo macalimiinta. Ka soo qayb-galka balaaran ee dhalinyarada soomaaliyeed



SCAWR 2023 WAR-BIXINTA SAAMEYNTA

“

Marka si dhab ah loo fiiriyo, tani waa wa-dada-shaqayn dhab ah iyo inaan ogaano cid waliba waxa ay qabanayso, xaqiiqdii waxaa jirta isku kasooni dhab ah oo aan la qiyasi Karin. Haddii arini soo korodho si wada jir ah ayaan wax uga qabanaa. Aniga ahaan tani waa arin aad iigu wayn. Barnaamij kale, ma ogi haddii qof kale uu ila qabo. SCAWR, waxaa jira dad badan oo xiisa u qabo in haddii dhibka jira ay wax ka qabtaa

”

SCAWR waxay u fududaynaysaa qoysaska inay ka soo qayb-gaalan arimaha badan sida ilaalinta carruurta (childcare), tignoolajiyada, ama kombuyuutarka taas oo u ogolaanaysa dadka ka soo qay-galay inay is bartaan iskuna xirmaan dhexdooda. Waa arin mar la arag ah

iyo dadka waawayn ba waxay dhiirigelinsiisay in SCAWR ay la wadaagto barnamijyo kale sida ballaarinta isku xirka bulshada iyo inay iska diiwaan geliyaan barnamijyo kala duwan oo si wanaagsan ku soo dhamaaday.

Dadka ay wad-shaqaynta leeyihiin SCAWR waxay leeyihiin isku-xirnaan dhamaystiran, wadaagida arimaha saamaynta leh iyo ka go'haanta la shaqaynta hay'ad gun-dhigeedu yahay adeega bulshada. Wax badan ayay ka qayqaadatay mudadii dheerayd ee ay howlahan ku jireen laga soo bilaabo barnamijka akhriska, abaalmarin kasta oo ay heleen waxay dib ugu noqonaysaa barashadooda ay ku gaareen ka qayb galooda wanaagsan.

Tusaale ahaan, ka qaybgalayaasha qaarkood waxay ka shaqaynayeen goobaha shaqada (home club) mudo tobanaan sano ah, iyagoo horumarinaya jidka xirfad-dhiska ee ay ku gaarayaan ISKAA WAX U QABSO waxbarid ee lagula shaqaynayo bulshada, si gun dheerna loo kaalmaynayo safarka waxbasho ee ardada. Kuwo kale waxay baraan kombiyurtarka ama waxay fududeeyaan hal-abuur akhris-qoraal, iyadoo ujeedadooda tahay inay xoojiyaan waalidiinta si ay awooda ugu yeeshaan ilaha waxbarashadda carruurtooda. Waagida dareenka dadka aan howl-wadaagta nahay waxay xoojinaysaa markhaati cadna u tahay horumarka la taaban karo iyo saamaynta togan ee dadka aan wada shaqayno ay ku bixinayaan jiritaanka SCAWR, dhiirigelinta socdaalkooda ay kaga qaybgelayaan mudada dheer.

Ka qayb-galayaasha waxay si guud isugu raacsan yihiin dareen ah in bulshada lagu horumarin karo barnamijyo si qoto dheer, loo siiyo dadka wax baranaya goob ay ku dhisaan xiriirkooda si caadi ah isugu yimaadaan ama ku kulmaan oo siisa dareen xoog leh oo ay leeyihiin.



44

**dadka wax baranaya waa
qeyb ka mid ah bulshada
gudahooda ayeyna is
dhisayaan ayadoo lala
qabo barnaamijka akhriska.**

**Markasta waxey heleyaan jid
toobiyo ah oo ay qeyb kaga
noqdaan hab dhaqanka
bulshada iyo waxbarashadeeda
ayagoo dareemaya in ay yihiin
qeyb kamid ah bulshada taasi
waa arin aad u xiiso badan oo
aad ku arkeysid sida ay
saaxiib u yihiin**

**Kaliya marka uu aasaaska cunuggu ku xoogeysanayo
wax akhris-qoraaleed, dhab ahaantii ma ku guulaysan
karaa. Wuxaan isku dayaynaa in aanu xoojino
aasaaskaasi, bulshaduna waxay taasi u sahlaysaa
inay ka faa'iidaystaan heerarka ay wax ka qabtaan.**

77

Inkastoo lagu guuleystay dhisidda bulshada, caqabadda ugu muhiimsan waxay ka jirtaa helitaanka maalgelin joogto ah. Barnaamijadan, oo ay inta badan iska indha tireen deeq-bixiyeyaasha, waxay taageero toos ah siiyaan xubnaha bulshada la hayb-soocay, lagama maarmaana ka dhigaya maalgashi balaaran iyo koboc.

Iyadoo la eegayo horey, wadahadalada u dhexxeeya la-hawlgalayaasha iyo SCAWR waxay ujeeddadu tahay in la tayeyeo muddada barnaamijka, iyadoo la tixgelinayo jadwalka xubnaha bulshada iyo baahida waxbarasho. Isu dheellitirka mudada fadhiba oo leh waxyaabo dhamaystiran ayaa weli ah mudhaanta koowaad. SCAWR iyo saaxiibadeeda ayaa sidoo kale isku dayaya in ay qiiimeyaan meelaha kale ee mudhaanta leh, sida ugu wanaagsan ee loo sugi karo tababarayaal muddo dheer ah iyo sida loo soo bandhigi karo faa'iidooyinka ay bulshada u leeyihiin ka qaybgallada mutadawiciinta ee ku saleysan bulshada.

Guud ahaan, iskaashiga SCAWR wuxuu ahaa mid si wadajir ah u taajiray, wadashaqeyn aan xuduud lahayn iyo doorar wadaag ah, fududeyn taalsoonida iyo xalinta dhibaatada wax ku ool ah. Ka go'haanshaha gaari-taankeeda, fududeyn ta qeybgalka iyo ka qeybqaadashada bulshada ayaa tusaale u ah waxyaabihii u gaar ahaa iyo guusha qaabka iskaashi ee SCAWR.





ARAGTIDA HOYOYINKA SOOMAALIDA: BARNAAMIJKAA WAX AKHRISKA

Ka-qaybgalayaasha barnaamijka wax akhris-qorista - hooyooyinka Soomaaliyed ee u heelan taageeridda carruurtooda, qoysaskooda iyo bulshadooda - waxay la wadaagaan caqabado qotodheer oo iyaga, iyo carruurtooda, ay la kulmeen ka hor intaysan ku biirin SCAWR. Dhibaatooyin badan ayaa soo maray in ay helaan taageero iyo kheyraad asaasi ah, iyo dareenkä in ay ka go'leen bulshada Soomaaliyed. Waxaa intaa dheer, in waalidiintu ay u arkeen inay ku adag tahay in ay carruurtooda ka caawiyaan shaqada guryohooda oo ay sabab u tahay caqabado kala duwan oo ay ka mid yihiin afka oo ku adag,

waxbarashooyin hore u jiray oo aan dhicin, caqabado xagga farsamada ah iyo caqabado wakhtiyada ah.

Qaar ka mid ah hooyooyinka waxay muujiyeen halganka ah in la caawiyo carruurta guriga joogta, iyo in xoogga la saaro kala-duwanaanshaha u dhexeeyaa deegaannada waxbarashada guriga iyo qaab-dhismeedkiisa, waxbarashada diiradda lagu saaray ee uu bixiyo barnaamijka shaqada guriga ee SCAWR:

“

Way adag tahay
in la caawiyo
caruurteena
markay guriga
joogaan.

Halkan waxaan ku haystaa afar
caruur ah oo ka faa'ldeysanaya
barnaamijka shaqooyinka guriga.

Runtii waxey waxtar u tahay
aniga iyo caruurga.

Way adag tahay inaad caawiso ilmahaaga guriga
jooga marka aad adiguba aanad haysan luqada
ama waxbarashadii horeba.

Tani waa mid caawisa.

”

Tani waa waaya-aragnimo guud ahaan ka jirta bulshada Soomaaliyed oo dhan. Caruurta guryaha markey joogaan ma ahan kuwa u heelan hawsha , mana ahan mid la mid ah waxa uu barnaamiju bixiyo. Sidoo kale, ugu yaraan barnaamijka shaqadda guriga ee 2 saacadood, waxay diiradda saaraan barashada halkii ay ka noqon lahaayeen shaashadooda.

19

%

boqolkiiba dhalinyaradi Musliminta
Madowga ahayd ee ka jawaabayay
waxay sheegeen in aysan ka helin
taageero waxbarasho oo ka yimaada
qoyskooda mar walba ama inta badan

Dareenkan waxaa la wadaagaa hooyooyin badan oo aaminsan in barnaamijka caruurta ee ay fidiso HAY ADDA SCAWR ay tahay mid muhim ah maadaama ay bixinayaan meel heegan ah oo ay caruurtoodu xooga saari karaan wax-barashada iyaga oo aan wax soo qorin, halkas oo ay kobcin karaan xiriirkha iyo xiriirkha ay la leeyihiiin asxaabtooda soomaaliyeed, iyo halka sare u qaadidda waxbarashadooda laga hormarinayo.

SCAWR waxay sidoo kale tixgeliisay waqtiga iyo fursadda ay ku habboon tahay hooyooyinkan, oo caruurtooda inta badan keena barnaamijka, si ay uga qayb qaataan barnaamijyada ku habboon. Barnaamijka wax akhris-qoraaleedku wuxuu noqday meel muhiim u ah hooyooyinka si ay u sahamiyaan waxbarashadooda shakhsii ahaaneed iyo isku xirnaanta iyagana - fursad muhiim ah oo lagu tilmaamay inay tahay mid la la'yahay ka hor inta aysan ku lug lahayn SCAWR.

Guud ahaan, ka qaybgalayaashani waxay si wadajir ah u muujiyeen saamaynta isbadalka ee barnaamijyada SCAWR, iyagoo ku tilmaamay natijjooyin kale oo wanaagsan una soo baxdey iyaga iyo caruurtooda labadaba. Waxay garteen horumarinno muhiim ah sida helitaanka xirfado cusub iyadoo loo marayo barnaamijyada, kobcinta iskaashiga xubnaha bulshada, iyo dareenka lahaanshaha iyo, iyo helitaanka taageerada kheyraadka asaasiga ah iyo gudbinta. Ka qaybgalayaashu waxay sidoo kale muujiyeen hoos u dhac weyn oo ku yimid walaaca, iyo niyad-jabka maskaxda ah, taas oo u suuragelinaysa inay wax si fiican uga qayb qaataan dowladnimada deegaanka iyo arrimaha bulshada.



SCAWR 2023
War-bixinta Saameynta

Markhaatifurkii ayaa sidoo kale muujiyey xaalado muhiim ah oo ay ka muuqatay ka qaybgalka barnaamijku, sida helitaanka Gargaarka Degdegga ah iyo xirfadaha CPR taas oo u sahashay ka qaybgalaha inuu badbaadiyo nolosha cunuggooda inta lagu jiro xaalad degdeg ah, iyagoo muujinaya saamaynta wax ku oolka ah iyo sida ugu dhaqsiyaha badan ee barnaamijiyada.

Ka qayb galka barnaamijiyada SCAWR waxay si wayn u yareeysa culayska ka-qaybgalayaasha iyada oo la siinayo jawi ay ku xirmaan asxaabta ayaga oo kale, baran karaan, qosli karaan, kuna dareemi karaan dareen ka-mid ahaansho, ka saamaxaya walaaca maalinlaha ah ee maareynta qoysaska iyo daryeelka caruurtta.

Waxa kale oo ay ka qaybgalayaasha barnaamijka la wadaageen qaabab kale oo SCAWR ay ku taageertay iyada oo la adeegsanayo adeegyo toos ah oo la xidhiidha guryaha iyo soo-galootiga, kuwaas oo sidoo kale qayb ka qaataj arrimo ku saabsan walaaca guud ee ay qabaan.

Marka la fiiriyo mustaqbalka, ka qaybgalayaashu waxay muujiyeen rabitaano barnaamijiyadii hore, mudada dheer oo xiisad ah, iyo ballaarinta barnaamijiyada carruurta, iyagoo xusay raaxada iyo muhiimadda ay hawlahani u leeyihii carruurtooda. Ballaarintan waxaa si gaar ah ugu jira fursado ay carruurtoodu u helaan fursad ay ku bartaan, kuna xajjiyaan afka Soomaaliga iyada oo loo sii marayo barnaamijiyada dhammaadka todobaadka. Waxay sidoo kale muujiyeen rabitaan ah in la helo kulamo bulsho badan oo loogu tala galay hooyoyinka ee bulshada ku dhex jira, oo laga yaabo in kulan shaah ama kafeega ah la sameeyo.

Hamida mudada dheer jirta waxaa ka mid ahaa isbedelka SCAWR oo ah madal ay uga faa'iideysato kaalmaynta qurba joogta xilliga qalalaasaha, taageeridda kaalmooyinka wax ku oolnimada ah ee la beegsanayo ee loola jeedo Soomaaliya. Sidoo kale, hooyoyinku waxay ka dhigtaan madal ay kafaalo qaadaan oo ay u dub dhexaad ka noqdaan xubnihii Soomaaliyeed ee ka go'ay qoysaskooda.



Xataa innaga oo qaan-gaar ah,
waxaa muhiim noo ah inaan is-aragno
oo aan la hadalno qof ku hadla afkeenna.

Horaantii, deegaankaasi kuma badnayn
dadweyne Soomaaliyeed oo aanaan
ku xirnayn. Marka la eegaayo SCAWR,
bulshadu aad ayey uga xoog badan
tahay. Bulshada noocan ah kuma
aananan arkin meelo kale.

Waxaan ka soo guuray magaalo kale – ma aanan aqoon meel
aan aado iyo waxa aan sameeyo; Waxaan ku xirmey iyaga,
waxayna iga caawiyeen inaan helo guryo aan awoodo.

Ka hor inta aysan SCAWR furin, aad ayay u adkeyd in la helo ilo,
aan ogaano meesha la tago, ama aad caawimaad u hesho.
Hadda, adeegyada tooska ah, wax waliba waa la heli karaa.
Wax waliba oo aanu u baahanahay, waanu tagi karnaa SCAWR





ARAGTIDA DHALLINYERADA KA QEYBGASHA SCAWR

Sida lala wadaagayo warbixinta oo dhan, waxaa jira dhowr qdob oo macluumaad laga uruuriyay daraasadda dhallinyarada Madowga Muslimiinta oo hoosta ka xariiqeysa caqababaha dhinacyo badan leh ee ay wajahaan dhallinyarada Soomaaliyeed ee ku sugar gobolka Waterloo. Si kastaba ha ahaatee, xogta tayada iyo tiro ahaaneed ee laga soo aruuriyay dhallinyarada ka qayb qaadata barnaamijka hawlaha guriga ee SCAWR waxay qayb ka yihiin saameynta togan ee ka qayb-galkooda barnaamiju ku yeeshay waxqabadkooda waxbarasho, kobcinta xirfadooda, iyo dareenka xiriirinta bulshada, iyadoo lagu salaynayo jawi waxbarasho oo taageero leh oo ay bixiyeen SCAWR iyo la-hawlgalayaasha.

Ka qaybqaadashadooda barnaamijyada SCAWR waxay u muuqataa inay bixiso jawi taageero leh oo aan ahayn oo keliya in uu gacan ka geysto hormarinta tacli-inta balse sidoo kale kobciya isku xirnaanta bulshada iyo dareenka bulshada ee ardayda. Dhallinyaradu waxay la wadaageen sababo badan oo ku saabsan saba-baha ay uga qeyb galaan barnaamijyada SCAWR iyo sida ay barnaamijyadan u saameeyeen. Tusaale ahaan, faal'iidooyinka kalluumaysigooda waxay keentay:



SCAWR 2023 WAR-BIXINTA SAAMEYNTA



boqolkiba dhallinyarada Madowga ah ee jowaab
bixiyaasha ah waxay wadaagaan in aysoon mar
wabba ama badanaa ku riyaqin inay addaan
fasallodooda

boqolkiba dhallinyarada Madowga ah ee jowaab
bixiyaasha ah ayaa sheegay inay dareenso
yihiin walwalama ay ka walbaacsanyihin dariqoda
mustaqbalka (tusaale ahaan xirfadooda iyo dugsi)



Helitaanka si ay uga caawiyaan su'aalaha ay caqabad ku yihiin shaqada guriga ee nidaamka taageerada ee habeysan.



Dhisiddha xiriirka ay la leeyihiin gayaankooda, halkaas oo ay ka caawin karaan midba midka kale, abuurista jawi waxbarasho oo taageero leh.



Horumarka waxqabadka tacliinta, oo ay ku jiraan fasalada wanaagsan iyo aqoon korodhka ku saabsan sida loo maro imtixaanada.



Lahaanshaha waqtii waxbarasho oo u heelan iyo taageero shakhsiyadeed oo aan laga heli karin goobaha fasalka ee waaweyn ee dugsiga.



Dhiirigelinta iyo jawi waxbarasho oo siyaado ah oo ka fog guriga, taas oo gacan ka geysanaya diiradda iyo wax-soo-saarka wanaagsan.



Fursadaha bulsho, samaynta saaxiibo cusub oo ka socda dugsiyada kala duwan, iyo ku riyaaqista isdhixgalinka asxaabta.



Gargaar tacliimeed oo gaar ah maadooyinka adag sida kimistiriga, xisaabta, iyo bayoolajiga, oo ay weheliso taageero aan toos ahayn oo maadooyinka kale oo ay lawadaagayaan gayaan kooda.

Dad badan oo ka soo qaybgalay ayaa sheegay in ay ku faraxsan yihi-in sida uu barnaamijkani gacan uga geysteen maadooyin gaar ah, gaar ahaan sayniska iyo xisaabta. Waxay dareemeen inay ku taageerayaan fahamka agabyada fasalada iyo dhameystirka hawlaho shaqooyinka. Qaar ka mid ah waxay muujiyeen horumarin ku saabsan fasalladooda, iyagoo xusay koror weyn oo lagu sameeyay waxqabadka waxbarasho ka dib markii ay ka soo qayb galeen barnaamijka. Waxay sidoo kale heleen macalimiinta inay yihiin dad naxariis leh, waxtar leh, oo dulqaad leh, xitaa marka ay la macaamilayaan arday badan oo isku mar ah.



**Waxaan si wacan ugu horumarayaa
iskuulka - waxaan wax ka baranaa
barnaamijkan in ka badan tan aan
ku barano barnaamijyada kale ee
wax barashada.**



Xogta sahanka ee 42 dhalinyaro ah oo ka qayb qaadata barnaamijka shaqada guryaha waxay xoojineysaa natijjooyinkan

Dhallinyarada ka qaybqaadanaysa barnaamijyada SCAWR ayaa sidoo kale qii-maynaya jawigii soo dhawaynta iyo kan ugu adag marka la barbar dhigo fursadaha kale ee wax barista, kuwaas oo baabi'inaya fursadaha dhalinyarada si ay ugu xidhmaan heer qof ama mid bulsho. Waxay aad u qiimaynayaan fursadda ay ku laxiri karaan asxaabtooda Soomaaliyeed, maadaama aysan had iyo jeer fursad u laheyn inay la falgalaan midba midka kale sababtoo ah sida ay ugu kala firidhsanyihiin gobolka Waterloo – tani waxaa si gaar ah u bixisay SCAWR oo aanay ku jirin barnaamijyo kale oo ku saleysan waaya aragnimadooda.

Ka-qaybgalayaasha kooxda diiradda dhallinyarada ayaa sidoo kale la wadaagay danahooda iyo farxadahooda ku saabsan barnaamijyada kale ee SCAWR, sida barnaamijyada ciyaaraha, iyo xiisaha ay u leeyihiin ballaarinta barnaamijyada isboortiga si ay ugu soo daraan cayaaraha kale sida kubadda kolayga.

Iyadoo ay aad ugu qanacsanyihiin kuna faraxsanyihiin ka qeybqaadashada barnaamijyada hawlaha guriga ee todobaadkan, ayaa ka qeyb galayaasha dhallinyaradu waxay soo jeediyeen dhowr dhinac oo sare u qaadi kara dhiir-gelintooda. Waxay muujiyeen inay xiiseynayaan in la qabto wax fudud oo la heli karo inta lagu jiro fadhiyada iyo, mararka qaar, dabacsanaan xoogaa dheeri ah oo ku saabsan muddada barnaamijka, gaar ahaan xiliyada iskuulka ee mash-quulka badan. Waxaa intaa dheer, waxay doonayaan fursado ay si qoto dheer ugu dhuumanayaan mowduucyo gaar ah ama danaha la xiriira manhajkooda oo laga yaabo in aysan noqon maadooyin caadi ah sida Xisaabta ama Ingirisiga. Habkan loo yagleelay wuxuu kordhin karaa ka qaybgalkooda wuxuuna u hormarin karaa danaha gaarka ah ee waxbarasho.

95 %

boqolkiiba dadka soo jawaabay waxay aad ugu qanacsanaayeen barnaamijka taageerada hawlaha guriga

95 %

boqolkiiba dadka soo jawaabay waxay aaminsan yihiin in fududeeyayaasha / shaqaalaha hagidda ay wax ku ool ahaayeen

95 %

boqolkiiba dadka soo jawaabay waxay wadaagaan in taageerada la siliyay ay la xiriirto wax ka qabashada baahidooda waxbarasho

95 %

boqolkiiba dadka soo jawaabay waxay aaminsan yihiin in fududeeyayaasha ay sameeyeen soo dhaweyn loo dhan yahay

93 %

boqolkiiba dadka ka jawaabay waxay ku xiran yihiin kuwa kale ee barnaamijka ah

93 %

boqolkiiba dadka soo jawaabay waxay dareemaan dareen xoogan oo ah in uu ku yeesho bulshadooda

93 %

boqolkiiba jawaabeyaashu waxay heleen aqoon, waxbarasho iyo / ama xirfado khuseeya waxbarashadooda / dugsigooda

91 %

boqolkiiba dadka la soo jawaabay waxay sheegeen in xiriirka ay la leeyihiin dadka kale uu hagaagay sababta oo ah ka qaybgalkooda barnaamijka



Sanadkii hore, waxaan helayay boqolkiiba 50. Ka dib markii aan ka qayb galay barnaamijkan, waxaan helay 70 boqolkiiba dhamaadkii semester-ka. Waxaan kor ugu kacay boqolkiiba 20. Barnaamijkan aad ayuu wax u tarayaa.

Mar walba ma arki karno caruurta kale oo Soomaali ah sababtoo ah kuma noolin meel isu dhow, mana helin inaan la joogno caruurta kale ee Soomaali-yeed haddii aan barnaamijyadaas la socon.

Waxaan dareemayaa dhiiranaan ku aaddan inaan guriga ka maqnaado si aan u shaqeeyo shaqadeyda guriga sababtoo ah waa jawi waxbarasho oo aad iigu fiican, la joogistana agagaarka asxaabtayduna way l caawisaa. Maadooyinkan oo kale ayaanu iska caawinnaa, sida xisaabta, xitaa maa-doojin kalle.

Aniga ahaan, waxaan ku riyaqsanahay in jaaliyadeyda l hareer joogto

Waxaan kor u qaaday xirfado badan oo aan ku barto qalabkan fasalkeyga dhexdiisa. Barnaamijka shaqadda guriga ayaa fahan fiican iga siiyay waxa aan qabanayey.

Barnaamijka [shaqada guri] waa meel furan, runtiina dadku way ku caawiyaan.

Waxaan sameeyey saaxiibo badan barnaamijkii kubadda cagta darteed.







TAAGEERADA BULSHADA



SCAWR 2023
War-bixinta Saameynta

Contact us

scawr@scawr.ca
519.279.4046

44 Gaukel Street, Suite 230
Kitchener, ON N2G 4P3

